Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 6-aad

Documentiga kalfadhiga 6-aad, kulankiisa:16-aad Tr:29.06.2015

Kalfadhiga 6-aad

Kulankiisa:16-aad,Sacad Furit.12:24 gh, Sacad Xirt.2:36 gd.

Guntin:162 xildhibaan.

Ajendaha:

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Warbixinta Wasiirka Arrimaha Guddaha:**

   Guddiyada Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka iyo Xuduudaha Federalka.
4. **Qeybinta Taariikh Nololeedka Xubnaha Guddiyada Madaxa-banaan ee Doorash-**

   Yinka iyo Xuduudaha iyo Federaalka.
5. **U Codeeynta Mooshin Codsanaya Qarsoodi.**

Shir-Guddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Shacabka Federaalka Soomaaliya.

Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

Waxaa Shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Federaalka Soomaaliya

Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan jawaari, waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shaacir.

Guddoomiyaha Golaha wuxuu xildhibaanada ka codsaday in ay ansixiyaan ajenda-ha xildhibaanada wey ansixiyeen ajendaha.

- **Guddoomiyaha Golaha, wuxuu soo jeediyay, Anagoo ku hadleyna magaca golaha shacabka waxaan tacsi u direyna ciidamada Burundi iyo ciidamada soomaaliyeed oo dhawaan la dilay ayagoo waa jibkooda qaran gudanaya gacan ka xaqdaran ay dishay allah u naxariisto, waxaan kaloo tacsi u direynaa marxuum: C/qaadir Xaaji Masale oo ku geeriyooday dalka U.K, oo aha Hogaanka abaabulka Xisbiga Hanti Wadaaga Kacaanka Soomaaliyeed, oo aan in badan soo wada shaqeynay alle naxariistii jano ha siiyo xaaskiisa iyo caruurtiisa samir iyo iiman alle ha ka siiyo Aamiin- Aamiin.**

Guddoomiyaha Golaha wuxuu ku soo dhaweyay, Wasiirka Arrimaha Gudaha J.F.S.

- **Wasiirka Arrimaha Gudaha Mudane:C/raxmaan Maxamed Xuseen(Odowaa)**

  Waxaan u mahad celinayaa Guddoonka Xildhibaanada waxaan ku faraxsanahay in aan manta an idiin hor imaado,oo idiin soo hordhigo Guddiyada heer qaran oo loogu tala galay guddiyada Doorashooyinka heer qaran iyo guddiga Xuduudaha iyo Federaalka sida aad ka war heysan shaqada Wasaaradda Arrimaha Gudaha markii leygu wareejiyay xilka oo ahayd **Tr:14.02.2015,**

  Masu'liyaadka ugu waaweyn ee wasaarada waxa ka mid aha sameynta labda guddi oo heer qaran ah, labada guddi waxaa horyaala arrimaha maamul u sameynta gobolada runtii wasaarada waxey muujisay dadaal badan iyo juhdi in ay galisay,wasaarada waxan ka wareysanay xog'hayaha iyo shaqaalihi waxaan ogaanay in waqti badan noo harin, guddiga in uu saameyn weyn ku leeyahay Hiigsiga 2016ka, oo soomaaliya wada sugayaan, halkas oo laga abaro Wasaarada Arrimaha Gudaha ku dhawaaqday iyado raaceysa, **Qod.47aad,110,111, iyo Qod.112aad,** ee Dastuurka Federaalka KMG iyo sharciga dhisida guddiga madaxa –banaan ee doorashooyinka qaranka ee golaha Shacabka Ansixiyay Tr:11.02.2015kii, wasaarada waxay xayaysiisay **Tr: 11.03.2015** araajida iyo dhamaan wabsadka iyo TV SNTV iyo UNIVERSAL in ay tar-tamayaal ka soo qeyb galaan iyo in araajida halkas lagu qabanayay, kadib markii ay soo gaba-gabowday qabashada araajida waxaa lagu daray hal isbuuc waxay soo gaba-gabowday **Tr:30.03.2015kii,**waxaa soo gudbisay labadii guddi

  356 qofood,oo soomaali ah guddiga doorashooyinka waxey noqden **272 qofod**

  Gddiga Xuduudaha waxay noqdeen **84 qofood,**in tooda badan waxey ahay-

  Een dad aqoon yahano ah, ka dib **Tr: 04.04.2015,** wasaarada arrimaha guddaha waxey magacaday guddi ka kooban 7xubnood, sida sharciga uu dhigayo

  Soo xulista xubnaha guddiga oo ah **356 xubnood,** oo ah xubnihii loo gudbin lahaa golaha wasiirada guddigas waxey shaqeyen ilaa **Tr:30.4.2015,** ayago wasaarada arrimaha gudaha u soo gudbiyay 27xubnood oo ah guddiga

doorashooyinka qaranka iyo 9 xubnod oo ah intii awooda u heshay guddiyadaas xuduudaha, golaha wasiirada waxay cod aqlabiyad ah ku ansixisay **taariikhda markey ahayd, 07.05.2015ka, 9xubnood,**ee noqonaya guddiga madaxa banana ee Doorashooyinka Qaranka.

Mudane:Guddoomiye, mudanayaal waxaa manta idiin horyaala dukumentigii oo ku lifaaqan qof walba taariikh nololeedkiisa ,golaha wasiirada oo noo soo gudbiyay labada guddi oo ah min 9 xubnood,dukumentigan oo aan ka soo shaqeynay oo dadaal badan ayan ku bixinay,mudanayaal Barlamaanka waa haya'dii sharci dajinta oo dalka ugu sareysay wad ku mahadsantihiin fursada ad I siisan in aan idiin soo gudbiyo.

Gddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay, Guddiyada madaxa banan ku soo dhawaada golaha shacabka kulankii 16aad, wasiirka waxaan ka codsanaya in aad noo keentid geedi socodka hadii aad heli karto, xokeynta soo qora xildhibaanada inta fekarkooda ka dhiibaneyso.

Xildhibaan:Maxamed C. Fadhaye, Point of order,wuxu soo jeediyay,Qod.112 Dastuurka Federaalka soomaaliya ee sameynta guddiyada madaxa banana habraca sax mahan sida wasiirka noogu sheegey, iyada oo aan ognahay in ay hadashay koonfur galbeed, putlan in ay hadashay,Madaxweynaha jubba lan uu yiri anaga nalama tashan,walaalahey la soo magacabey yaa loo sameynayaa Qod. Dib ha loogu noqdo waa in laga qeyb galiyaa dowladaha xubinta ka ah dowlada federaalka xuquuq bey ku leeyihiin.

Xildhibaan:Maxamed Afaraale,wuxu sheegey, hadii sharciga jaban yahay in la hadlo ma banaano waxa halkan fadhiya xildhibano oo sharci ilaaliyayaal ah,in leys qoro mahan.

Xildhibaan:Cabdi Fatax Nuur Matan,wuxuu soo jeediyay, dal wuxuu federaal noqon karaa,dad aan isku diin ahayn, isku af ahayn, isku dhaqan ahayn,waxaa nahay dad isku mid ah wasiirka wuxuu halkan ka sheegey in guddiyadan dadaal badan laga soo maray in waqti badan la geliyay, in daruufo badan lala soo maray,waxa halkan laga muujiyay in maamul goboleedyada lala tashan waxan qabaa in wax laga saxo madam dalka dhibato ka jirta maamulada kale xuquuq bay wadanka ku leeyihin.

Xildhibaan:Daahir Aamiin Jeesow,wuxuu sheegey,labada guddi oo halkan jooga waxaa soo diyaariyay, guddiga arrimaha gudaha eeBarlamaanka,guddigan waa kii wax walba u fududeyn lahaa barlamaanka, marka in sharci la durayo in uu jiro waxan hubaa in ay u qoranyihiin dhamaan shuruucda, tusaale guddiga xuduudaha dhaman haya'daha kale waa ka madax banana yihiin marka laga reebo barlamaanka, warbixint kasto waxa uu kenaya barlamaanka go'aan qaadashada waxey ku xiran tahay barlamaanka, guddiga Doorashada waa ogtihiin hiigsiga 2016ka dhibatada wadanka taalo waa dhibkii looga bixi lahaa, guddigan waa kii la dhihi

lahaa wadanka doorasho ma ka dhici karta mase kama dhici karto gudigan yaan la siyaasadeen,waxa ku qoran doorasho hal-hal ah.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay, mudanayaal waxaa is qortay 34xildhiban qof kasto waa in uu hadla 3daqiiqo.

Xildhibaan:Nadiifo Maxamed Cusmaan,waxey soo jeedisay,gudiyashan waa muhiin waana daruuri soomaaliya sidaan ku gaari la hayn sinaan iyo cadaalad, hadan ku soo xulano nin jecleysi oo qofka xuquuqdiisa lagu tunto waa dhibato,waxaa ka maqan qabiilka gugun dhabe oo daga itoobiya ilaa Kenya, haleyska dayo cadaalad darada.

- **Wasiirka Arrimaha Gudaha Mudane:C/raxmaan Maxamed Xuseen(Odowa)**

  Wuxuu sheegey,guddigan waxaa lagu dhawaaqay 11.03.2015ka,waxana la ansixiyay 07.05.2015ka, cidii soo gudbisaneyso wey soo gudbisatay bil in ka badan ayuu ku jiray meediyaha,gole siyaasadeed iyo gole wasiir midna laguma dhisin,arinta qabiilka waa lagu dhisay waxaa lagu dhisay 4.5, madama aan ka dhignay arin boblika ah cid na tiri ma jirto guddiyadan si qaldan ayaa lagu dhisay waxaa soo baxday 18 qof, xildhiban nadiifo waxey shegtay meesha wey ka jiraan waxaa soo socdan guddiyo badan fursado waa jiraan.

Xildhibaan:Nadiifo Maxamed Cusmaan,waxey soo jeedisay,waxaan rabaa arintan wasiirka ka hadlay haday dhab tahay oo guddiyada lagu soo dhisay 4.5.hada guddiyada dib haloogu noqdo maahan in aan haye raac noqdo dad ban matalaa xaq bey u leeyihiin dadka maxaa loo dhihi wayay kan dambe soo gala waxaas ma noqoneyso mar-marsiyo.

Xildhibaan:Raabaco,waxay sheegtay, wax walba farahey ka baxayan guddiyada waa kuwii shaqeyn lahaa hiigsiga 2016 ka, hadaan dalka la badbaadin waa mushaakil waxaa sii dheeranayo burusaska wadanka wuxuu gala is jii-jiid, guddiga doorashada iyo guddiga xuduudaha waa loo baahan yahay waxan idiinka codsanaya in aad bad baadisan qaranka barlamaanka jubba wad diideen tasna waa iishu,waa in aad ansixisan.

Xildhibaan:Bishaar Ugaas Ibraahim,wuxuu soo jeediyay,mudane wasiir sida aad sheegtay labada guddi ee la soo xulay wasaaradda ay qusayso si cad loma soo xulin waxan ula jeeda waxa soo gashay 356 qof oo codsatay,waxaa nagu maqaalo ah in dhowr iyo toban qof ay soo codsatay,waxaan la qeexin habraci Dastuurka iyo sharcigii lagu dhisay guddiga doorashada iyo guddiga xuduudaha waxaa laga raba in aad kento araajidii codsiga ay soo gudbiyeen si an u aragno qof laga tagey oo aqoon leh iyo mid aan aqoon laheyn oo la qaatay.

Xildhibaan:Jaamac Oday,wuxuu sheegey, waxan u hambal yay nayaa dadkeena

manta shaqada la soo siiyay oo ku soo guuleystay wasiirka xaq buuleeyahay anagana xaq baan leenahay labada guddi waa loo baahan yahay waa in nalo keena C.V oo an mid-mid u akhrino oo an dhahno kan waa sax iyo kan waa qalad.

Xildhibaan:Maxamed Cumar Dalxa,wuxuu soo jeediyay, aniga waxaan la qabaa xildhi

Baan nadiifo meeshay ka abaartay, hadaan cadaalad la fiirin,hadan la helin garsoor fiican waligeen dhibka lagama baxayo dhaqaale ha noqoto, amni ha moqoto,dadka halkan fadhiya guddi iska daye wax ka waa-weyn ayay is taahilan aqoon ayan u leeyahay,guddiyada wixii muhiimka ahaa gadaal ayaa loo dhigay, soomaaliya waa leys dilay hub ayaa gacantooda ku jira wali lama sameyn guddiga hub ka dhigista beel walba hub ayay heysata yaa sanduuq doorasho gali karo, guddiga hanti usu soo celinta lama sameyn meeshan waxa ka muuqda faro wasiir.

Xildhibaan:Ciise Wahliye Maalin,wuxuu sheegey,waxaa meesha lakeenay labo guddi oo madax banana oo Dastuurka uu noogu qoran yahay guddiyo badan in ay jiran wan ogahay ogolaashahoda adinkuu idinku xiran yahay Haa iyo Maya, waxan is wey diineynaa goormey shaqo qabanayan xildhibano dib u fekera doorashada soo socta labada wixii macquul ah inla qaato.

- **Wasiirka Arrimaha Guddaha,C/raxmaan Maxamed Xuseen(Odowa)**

  Xildhibaan raabaco hadalkeeda waxan ka fahmay yan la dheeran burusaska mahad sanid, xildh.bishaar wuxuu yiri hala keeno 356 qof C.V. ga shaqo an 3bil soo wadnay man hada ku noqoneyna waa jug-jug meeshada jog , sida uu qabo xeer-hoosadka waa in loo dhibo 7 qof oo lagu kalsoon yahay golaha wasiirada waxaa la geyay 27 qof waxay ka soo dhigeen 9 qof ,9qof, waa idiin hor yaala saakay sida uu ra'yigiina idiinla noqdo ka dhiibta waxan isleeyahay manta meeshii ugu fiicneyd ayay joogta , guddiyada uu shegay dalxa waa run waa muhiim laakiin waa in ay keentaa wasaaradaha kale.

  Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay, guddiyadan hada la ansixiyay ma loo ansixiyay miisaaniyad.

- **Wasiirka:** wuxuu sheegey, haa labada guddi oo idiin hor fadhiya waa loo ansixiyay miisaaniyada iyo xafiiskooda waa loo diyariyay, maahan in Wasaaradda arrimaha guddaha ay ku jiraan miisaaniyada, miisaaniyada waxaa bixineysa doonaliska, waxaa kale oo loo diyaarshay xafiiskii ay ku shaqeyn lahayeen, waxaa kale oo loo ogolaaday maamul goboleed yada sida,koonfur galbeed, maamulka jubba

Xildhibaan:Axmed Dhinbil Casawe,wuxuu soo jeediyay,waxan u mahad celinayaa wasaaradii soo dadaashay oo soo xushay dadkan hortana keentay, soomaalida halkey wax ka bilaabi jirtay barlamaanka ayaa la dooran jiray ka dib ayaa reer-reer

loo soo xuli jiray, marna odayaal ayaa qeybinayay,golahii wasiisara hada waxaa la oranaya marka hore in ayna soo dhaafin qoladaasi, gudigan inta badan wan aqana waa aqoon yahano xildhibano hore ayaa ku jira waxba baadi goob ha galina Wasiirka yaan la daalin anagana yaan waxba isdaalin hala ansixiyo.

Xildhibaan:Maxamed C/laahi (Nuux),wuxuu sheegey,waxaad mooda in ay munasab

Ku tahay,wixii la xulayo taariikhdooda iyo meesha ay ka yimadeen C.V in la soo gudbiyo laakiin baahi aya jirta qofka marka loo fiirinayo iyo gudiga waxay masu'l ku tahay qof walba oo barlamaan ka tirsan waxaa keenayso baahida taagan laakin ma mudna in dhinac laga fiiriyo xeer baa jira oo aan anaga ansixinay waxey ahayd in guddiga mar hore meel maro isago guddiga wax badan ka soo dib dhacay aniga waxan aamin sanahay in ay munaasab tahay qofkii aan istaahilin in uu halkas ku hakado laakiin baahi ayaa hada jirta, guddi baa soo xulay ka dibna waxaa la kenay golaha wasiiradda hada waxey mareysa Barlamaanka mar walba wixii maslaxada ku jirto waa in la meel mariyo,waxan isleeyahay dadkan hada la kenay wey istahilaan.

Xildhibaan:Axmed Taaw,wuxuu soo jeediyay, mudane wasiir guddiyadan la soo xulay qaabke ku doorateen ? dadka markay tartamayan oo la reebo dhibka uu leeyahay Waxaa garan karo qofkii soo maray, laba dan guddi waa labo guddi oo bahi lo qabo Oo tagan hadan ka soo qato guddiga doorashooyinka hadayna hada ayna howl galin waxaad la kulmeysan dhibaato oo ah in la yiraahdo waa KMG, guddiga xuduu-daha maamulada hada jira waa kuwa xuduuda u sameyn laha walalayal an ansixino.

Xildhibaan:Zeynab Maxamed Camir,waxey sheegtay,waxan qabaa in la celiyo gudd-iyadan maxaa yeelay waxay ka kooban yihiin **18 qof,** waxa ku jira **3 gabdhood,** waxa jirta soomaali badan oo aqoon leh wasiir kasto qof buu kensanaya guddiyadan waa kii kala diri lahaa barlamaanka aniga waxan soo maray 4 barlamaan mar kasta wey kala diraan waxaa jira aqoon yahano badan oo laga soo tagey meeshaba an laga soo qaadin soomaali cadaalad baa qanciso.

Xildhibaan:Caadil Sheegow Sagar,wuxuu soo jeediyay,waxaa la keenay barlamaanka 16 barnamij oo ah in guddiyadan dib u dhigno sababta oo ah macno kale ayay sameynaysaa oo ah in barlamaanka caqabad ku noqoto,waxan rabaa in barlamaa-nka ka foojignadan.

- **Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Federaalkam Mudane:C/raxman M.Xuseen**

  Wuxuu sheegay, su'aasha ugu muhiimsan guddiyada maxaa u soo dooraten baa nala yirn adinkoo raali ka ah waxaad ansixiseen Qo.7-aad habraaca magacabista guddiyada waxaa ka mid ah,wasiirka wasaarada ay quseyso arimaha Doorashada in ay bulshada soomaaliyeed dhexdeeda ka soo dhex doortay guddi la talliyayaal ah oo ka koban 7 xubnood oo KMG ah ,guddiga 7 xubnod wuxuu habraacaya wasiirka,jagada madaxa –banaan qofkii soo

codsanaya waa in ay noqdan, dad magac leh, sumcad leh, aniga waxan laha masu'liyada wasaarad ahaan, marka hore golaha wasiiradda ayaa ansixiyay, saakay Golaha Barlamaanka ayuu horyala, ansixinteeda iyo dib u dhigistooda wax allaale wixii ad ka tirahdan adinkey idiintala.

Xildhibaan:Goodir,wuxuu soo jeediyay,waxan filayaa shuruudaha lagu sameynayo guddiga doorashooyinka iyo guddiga xuduudaha barlamaanka ayaa la horkeenay anaga ansixinay barlamaanka wuxuu wakiil ka yahay labada aqal, aqalka sare iyo aqalka hoose labadaba isaga wakiil ka ah oo masu'liyadiisa saarantahay manta madasha an u fadhino waxaa loo baahan yahay mustaqbalka xildhibaanada hada jooga iyo masiirka umada soomaaliyeed manta halkan an taaganahay hadii aan dib ugu noqono waxaa suurta gal ah in aan ku noqono KMG waxa weeye gacnaheena ayaan ku sameysanay maamulada ku meelgarka iyada oo ay ahayd in lala tashado,wali rasmi mahan ayaga la caawiya dadka halkan fadhiya waa aqoon yahano halo ansixiyo.

Xildhibaan:Sheekh Aadan Madowe,Point of Order,wuxuu soo jeediyay, wasiirka marka uu joogo golaha wasiirada iyo golaha barlamaanka waa isku mid xildhibaan ayaa soo jeediyay waa kii barlamaanka kala diray guddigan waa guddi farsamo oo aad shalay adinka ansixisan guddiga wax alle wixii go'an ay gaaran barlamaanka ayay horkenayan shaqsi waa la ogolankara waana la diidi karaa in aan la eegin wax yaabo an jirin waxa barlamaanka la kanay CV soo akhrista ka dibna dooda ka bacdi hala codeeyo.

Xildhibaan: Cabdi Cali Xasan,wuxuu sheegay,maba'diida guud ee Dastuurka iyo sharciga halkan laga ansixiyay, wasiirka waxaan weydinaya 7 qof ee soo xulay labadan guddi in aad noo kentit magac yadooda halkan ku soo gudbiya si an go'aan ugu qadano, wasiirka waxaan weydiinaya Qod.3aad,Dastuurka qeybta maba'diida aasasiga J.F.S. awood qeybsiga cidna ma bedeli karto nidamkas Waa Qod. 4aad, F-1aad, isla sharciga ilaa linta iyo midnimada J.F.S waa sharci Doorashada.

Xildhibaan: Sareedo Maxamed Cabdala,waxey soo jeedisay,guddiyadan waa guddi qaran in aan ansixino waa sharci waa in aan u hogaan sananaa sharciga waxaan diidi karno waa diideyna in la ansixiyo waa sharci qof la yiri waa lagu o goladay hadana waa lagu diiday dhibkeeda ayay leedahay.

Xildhibaan:Cabdi ladiif Sanyare,wuxuu soo jeediyay, wasiirka su'aalihii la weydiin lahaa mar hadii intaas xildhibaan ay dooden waxan qabaa in wasiirka leyska fasaxo gudigan la keenay waa dad aqoon yahano ah oo qaranka u soo shaqeyay maqabo hebel baa CV sidan ahaa cabasho waa iska jiraan waxan lee yahay dadka cabanaya hala soo hagaajiyo dawlad goboleedyada halala tashto wasiirka guddiga haloo ansixiyo.

Xildhibaan:Aweys Cabdulahi,wuxuu sheegay, waxaan raba in aan ka hadlo Qod.Dasturi ah,Qod.111-aad, dalku wuxuu yeelan doona guddiyo madax-banaan heer federaal iyo heer dowladaha xubnaha ka ah dowlada federaalka soomaaliya waajibad koo da iyo xilkooda, iyo tiradooda, waxaa lagu qeexaya xeer ah lagu ansixiyo labada aqal ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa lala tusaaleynaya Q0d.49aad, tirada iyo Xuduudaha dowladaha xubinta ka dowlada federaalka cusub waxaa go'aaminaya golaha shacabka ee barlamaanka federaalka, waa in lala tashtaa dowlad goboleedyada lagana qeyb galiya madama ay xubin federal ka mid ah ay tahay.

Xildhibaan:Ibraahim Ilka Cas,wuxuu soo jeediyay,waxaan rabaa in aan ka hadlo Qod.111-aad, ee Dastuurka dalka wuxuu yeelan karaa guddiyo madax banana heer fedaraal iyo heer dowladaha xubnaha ka ah dowlada federaalka soomaaliya waajib kooda , iyo tiradooda, waxa lagu qeexaya xeer lagu ansixiyo labada aqal, marka la dhisayo waa tan sheegeyso maamulada, F-2-aad, iyadoo la tixgalinayo durufaha gaarka ah oo guddiyadaas loo xil saaray,xubnaha ka qeyb galaya waa in lagala ta shadaa in ay ka qeyb qatan dowladaha xubinta ka ah dowladaha federalka soomaaliyeed, Qod.43, wasiirka wuxuu yiri miisaaniyada kuma jirto bajadka dowlada ee waxaa bixisa Donaliska, Qod.41aad,wuxuu leeyahay wey ku jirta bajadka dowlada oo lo qorshayay Wasaarada, wasiirka ha noo keeno warqad cadeyn ah.

Xildhibaan:Maxamed C. Fadhaye,wuxuu sheegey,barlamaanka ayaa loo soo bandhigay oo ansixiyay anaga ma ka hadleyno waa qalad waxa meesha yaala waa Dastuur Qod.111-aad, sameynta guddiyada madaxa banana in lagala tashado dowlad goboleedyada inta israceyso Dastuurkay ku cadahay mudane:Wasiir hadaad la tashatay masu'liyiinta oo waraaq noo keenin maxaa keenay mudaaharadka, Mudane: wasiir ma dhago li'id wad ogtahay cidna ma bedeli karto cidii mudan waa in wax laga siiya waa in lagu bedela Q0d.184,waa in la ilaaliya.

Xildhibaan: Gesay Toosin,wuxuu soo jeediyay, Madaxweyne ayan Quaram la sameystay sharci ma noqoneyso sharciga maamul goboleed yada waa in uu barlamanka ansixiyaa waa in uu sistamka soo maraa waa in uu ku dhisnayn qabiil iyo xoog dadka waa af duuban yihiin.

Xildhibaan:Yaasiin Cabdi seed, wuxuu sheegey,waxa hada socdaan sharafta Barlamaanka ayay wax u dhimeysa waxan soo jeedinaya in aad shirka xakameysan.

Xildhibaan:Cusmaan Xaaji Cali,wuxuu soo jeediyay ,jigka uu soo maray wasiirka waa wax isaga u gaar ah waxan qabaa in nala siiyo CV yada,waxan rabnaa in si rasmi ah loo soo aqriya.

Xildhibaan:Sheekh Ibraahim,wuxuu sheegey, hadii la jabiyo qodob Dastuuri ah waxba

Halabayo wasiirka ha ka fiirsado waa in la qanciyaa maamul goboleedyada waana waajib waxan aamin sanahay in cadaalada sidii hore loo fiirin.

Xildhibaan:Bacos,wuxuu soo jeediyay, Golaha shacabka ayaa noo keenay xuduud-aha waxan soo jeedinayaa in la ansixiyo guddiyadan.

Xildhibaan:Ruush,wuxuu sheegey, in dadkan la soo xulay ay yihiin aqoon yahano xilal kala duwan ay wadanka kasoo qabtan EX xildhibaano ku jiraan waa in la ansixiyaa.

Xildhibaan:Axmed Dhinbel Casawe,wuxuu soo jeediyay, manta oo dhan waxaad ku cel-celinaysan Q0d.111, ma dhameystirna maamul goboleedyada hala ansixiyo hadii kale naga daaya ilaa –lowya cade ay ka imanayso.

Xildhibaan:Cali Aadan Elow,wuxuu sheegey, wasiir waa in maamul goboleed yada ka keentaa warqad ogolasho ah leysma weydinayo in ay cadaalad daro jirto.

Xildhibaan:Nuur Maxamed,wuxuu soo jeediyay, cadaalad ma jirte iimaankiina sugta waxan rabnaa in ay noo cadeeyan dowlad goboleed yada iney yihiin sharci.

Xildhibaan:Yaasiin Cabdi Seed,wuxuu sheegey, Wasiirka wuxuu muujiyay dulqaad, waan u mahad celinaya guddiga xuduudaha waa guddiga sixi doona qaladaadka Adinka aad gashaan.

Xildhibaan:Dr: Cilmi,wuxuu soo jeediyay, Dastuurkeena wuxuu la bilowday federaalka wuxuuna leeyahay waa in 60 maalmood lagu sameeya guddiga xuduudaha iyo inaan is waafajino laba daas mudo gaaban bay jirayaan.

- **Wasiirka: Cabdiraxman Maxamed Xuseen (odowa)**,wuxuu sheegey, la tashiga maa-mul goboleedyada haday diidan ma sameysmayso miyaa wax dacwad ah oo ay ka qabaan majirto warqad xafiiska iigu timidna ma jirto waxan rajeyna in ay guul iyo wanaag ku dhamato.

Kalfadhiga 6-aad, Kulankiisa:14-aad, uu shir Guddoomiya Golaha Shacabka J.F.S.

Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,uu shir Guddoominayay,uu sheegey in uu shirka xiran sacada markey ahayd 2:36 gd.